

Gargaarka FEMA iyo SBA wuxuu gaaraa

\$3.7 Million ee loogu talagalay Kabadbaadayaasha Duufaanta Ohio

Release Date: May 31, 2024

COLUMBUS - Keliya bil kadib tan iyo markii Madaxweyne Joe Biden ugu dhawaaqay musiibo weyn Gobolka Ohio kadib duufaanadii Maars 14, 2024, in ka badan **\$3.7 million** ee ah gargaar federaal ayey bixisey FEMA iyo Maamulka Ganacsi Yar ee Mareykanka (SBA) si loo kaabo soo-kabashada.

Milkiiliyaasha guri iyo kireystayaasha oo guriyahooda iyo hantidooda ay waxyeleysay dabeylaha, kuwaas oo wali u baahan iney cadsadaan gargaar federaal, waxey qabaan ilaa July 1, 2024, iney sidaa sameeyaan.

Sida aytahay **May 31**, gargaarka soo-kabasho ee Ohio waxaa kujira:

- Wax ka badan **\$2.4 million** ee ah deeqaha Barnaamijka Shakhsiga iyo Qoyska ee FEMA (IHP) ee la siiyo milkiiliyaasha iyo kireystayaasha u qalma ee gobolada kow iyo tabanka ee Ohio. Deeqahan waxey baxshaan khasaaraaha iyo waxyeelada aan la caymin ama leh caymis gabaabsi ah, ay ku jiraan:
 - In ka badan **\$1.5 million** ee deeqaha guriyeyn ee FEMA ee lagu caawiyo in lagu bixiyo dayactir, guri bedelid iyo gargaar kiro ee guriyeyn ku-meel-gaar.
 - In ka badan **\$951, 000** Deeqo Gargaar Baahiyoo Kale ee lagu caawiyo bedelidaan guri ee shakhsii ah iyo baahiyoo dabeyl daran la xiriira - sida guuritaan iyo kharashaad keydin, gaadiid, daryeel caruur, iyo kharashaadka caafimaad iyo ilko.
- In ka badan **\$1.3 million** ee deymo muddo dheer, ribacoodu hooseeyo ayey u ansixisey Maamulka Ganacsiga Yar ee Mareykanka milkiiliyaasha guri iyo kireystayaasha si looga caawiyo dayactir, dib-u-dhisid ama bedelid waxyeelo guri iyo si loo daboolo dhaawac ganacsiyada dhammaan qeybahooda iyo ururuada aan macaash-doonka ahayn.

Kow iyo tobanka gobolka ee Ohio ee loo magacaabey gargaar FEMA ee musiibadan waa: Auglaize, Crawford, Darke, Delaware, Hancock, Licking, Logan,



FEMA

Page 1 of 2

Mercer, Miami, Richland iyo Union.

Kooxaha Gargaar Ka-badbaade Musiibo (DSA) waxay booqanayeen xaafadaha dabeyshu-saameysey ee gobolada loo magacaabey si ay uga caawiyaan dadka degan iney codsadaan gargaar FEMA, aqoonsadaan waxna ka qabtaan baahiyo degdeg ah, ayna sameeyaan ugudbino hay'ado maxali, gobol ama is-xilqaan ah wixii ku saabsan kaalmo dheeri ah. Ilaa hadda, shaqaalaha DSA waxey booqdeen in ka badan **7,500 oo qoysas** iyo **370 ganacsyo** si ay ka-badbaadayaasha ugu xiraan gargaar.

Intaa waxaa dheeri ah, Xarumaha Ka-badbaadayaasha Musiibo ee FEMA waxaa laga furey gobolada saamoowey si loo siiyo gargaar waji-ka-waji ah ka-badbaadayaasha. Xarumaha, takhasusyahano kasoo-kabasho oo ka socda FEMA, gobolka Ohio iyo Maamulka Ganacsiga Yar ee Mareykanka ayaa bixiya macluumaad ku saabsan adeegyada la heli karo, sharxa barnaamijyada gargaar, caawiyana ka-badbaadayaasha iney dhamestiraan ama hubiyaan xaalada codsigooda ku saabsan gargaar. Ballan lagama maarmaan uma ahan in la booqdo Xarun Kasoo-kabasho Musiibo. Iska-soo-galyada soo dhawaada.

Si aad u heshid Xarun Kasoo-kabasho Musiibo ee kuugu dhow, booqo [fema.gov/drc](https://www.fema.gov/drc). Xarun kasta waxaa loo booqan karaa gargaar.

Si aad u codsatid gargaar FEMA adigoon booqan xarun, onleenka aad [DisasterAssistance.gov](https://www.disasterassistance.gov), lasoo dag [abbka moobeelka FEMA](https://www.fema.gov/abbka-moobeelka-fema) ama ka wac FEMA Qadka-Caawinta ee 800-621-3362. Haddii aad isticmaashid adeega isku-duwida sida adeeg isku-duwid muuqaal, adeeg taleefon ee qoraal leh ama waxkale, usii FEMA taleefonkaaga adeegaas markaad codsaneysid.

Xog dheeraad ah ee ku saabsan hawsha kasoo-kabasho musiibo ee Ohio, booqo www.fema.gov/disaster/4777.



FEMA

Page 2 of 2